WAAR XABADDU WAA LACAGE, DAB KU DHALAALI!

C/Rahman Eelay eediran@hotmail.com

Booliska hororka ah Beesha isa siisa Hargeisa ee ka soo faranduleysa saldhiga Kubor ayaa maalin walba baad ka qaadi jirey nin ka mid ah Beelaha laga tirada badan yahay kaasoo dukaan timo jara ah ku haystay Xaafadda Xera Awr ee Magaalada Harga-Geys. Cabdinaasir ayaa u adkeysan waayey in maalin walba lacagtii uu dhididkiisa kusoo shaqaystay lagu bahdilo oo rag marqaan raadis ah ama uu ku badhgo'ay qaadku ay si sahal ah ku qaataan. Maalintii danbe ayaa

wuxuu isbarbar dhigay lacagtan ay u baahan yihiin qooysiisa uu isagu masruufo iyo nimanka iska jeebbaarta ujeedadooda. Wuxuu go'aan ku gaaray inuusan lacag danbe oo baad ah bixin. Maangaabyadii direyska xidhnaa ayaa dukaanka albaabkiisa isasoo dhereriyey iyagoo C/Naasir u hanjabaya:

Waar hooy na dhegeyso, waar hooy Abbaanow na maqal, waar hooy Cabdinaasirow goroda laalaadi, waar hooy xaafaddan Xera Awrna xerta Binu Haashimkaa leh, Waar hooy direyskana Duriyadaanu u sidanaa, waar hooy tima jaraha waanu kula leenahay, waar hooy lacagtana waanu kula qaybsan, waar hooy Addoon aanu leenahaad tahay, waar hooy ha maqlin bahaa-bahaada qurbaha, waar hooy dheg ha u dhigin xuquuqul insaanka la sheegayo, waar hooy dhalanteedka dheg ha u raaricin, waar hooy kuwaa dibedda ka qaylinaya ma garan, waar hooy haddey yimaadaan madaxey foorarin, waar hooy anuunbay baaleshle ii noqon, waar hooy anuun bay ii nacamleyn, waar hooy sidaadii soo soco beesada, waar hooy daa madax adeyga iyo isadkeynta, waar hooy internetka iyo qashinkey qoraan iska illoow, waar hooy Maxaakiimtan xiiqsan hadaaqooda ka bax, waar hooy anuun baad I hoos joogtaaye isukey dullee, waar hooy waanu soo noqonaynaaye marqaankayagii sii diyaari, waar hooy gunuunaca iyo guraabaaska daa, waar hooy waad deg-degaysaaye

waa lagu dejin, waar hooy yeynaan ku xabaal nololin, waar hooy Diintaa qabta inaad Sayidkaaga maqashid, waar hooy Diintaa qabta in Addoonka madaxa adag la ciqaabo, war hooy Diintaa kuu diideysa diya iyo xaqtoona, waar hooy Diintaa qabta inaad canshuur iyo baad bixisid, waar waan kuu soo noqonayaaye Midgaanow bal halagaa waayo kistayadii!

C/Naasir ayaa cid usoo gurmata waayey. Dadku kala naxariis badane, derisku kala damiir roone bustahoodii ayay hoosta kasii galeen iyagoo Ajiga u dhow oo dhami ay hoostaa kasii leeyihiin: " Baastar! Qayla dheeraa, hiinraag badanaa! Ma sagaaruu tolow caydhsanayaa". Naftu waa macaan tahaye, C/Naasir ayaa af labadii yeedhay:

Waar miyeydaan damiir lahayn, waar maskiin agoon koriyaan ahay, war timahaan jaraa, war ma helo qutulyoonka reerkaba, waar xagaan maalin walba baad ka keenaa, waar miyeydaan boolis aheyn, waar miyeydaan amniga qaabilsaneyn, waar haddaad na baadaan tuuguna muxuu sameyn, waar leejadan baas ee beesheena uun saaran waa maxay?

Alla! Alla! War iga daa bilaawaha! War dhiig Islaam ha gelina! Alla yaa Islaameey, Alla yaa Ummada Nebi Maxamad ah, Alla yaa Soomaaliya, Alla yaa naxa, Alla yaa iga qabta, Alla ii gurmada, Alla yaa iga celiya, Alla yaa I maqlaya, Alla yaa waxgarad ah, Alla yaa dhiidhiya, Alla yaa ii naxa, Alla iga daaya toorida, Alla iga daaya bilaawaha, Alla miyeydaan Islaam ahayn, Alla maad ii naxariisataan, Alla miyaan laydiin soomin, Alla miyaan laydiin salaadin, Alla miyeydaan naxariisan, Alla miyeydaan ahayn…….!

Alla maxaad ii xireysaan, Alla waa maxay gardaduubku, Alla aan jirkeyga daadanaya ceshtee idaaya, Alla aan dhiiga daba qabtee ha I xirina, Alla biyooy, Alla igu haba baraf! War yaa Islaamey, war waad imaqashaane iisoo gurmada, Alla igaqabta nimanka, Alla ii naxariista, Alla waa maxay batroolku, Alla igadaaya, igadaaya, Alla ha igubina, Alla ha daarin qarafka, Alla yaa muslineeey, Alla yaa Ummada Nebi Maxamad ah, Alla yaa Soomaaliya, Alla yaa naxa…….!

Hooyooy hooyo, Hooyooy hooyo, Alla Hooya macaan, Alla Hooyo ma I maqashaa, hooyo waan hurayaa, hooyo dabbaa laygu shiday, hooyo

waan gubanayaa, hooyo waan shiilmayaa, hooyo waan shuuqayaa, hooyo waa naar adduun, hooyo neecaaw ma leh, hooyo kaaley I afuuf, hooyo Eebe ii bari, hooyo miyaanan lay aareyn, hooyo miyaadan xusuusan Khadar, hooyo miyaadan garaneyn kuwii jirkooda la siiyey waraabaha, hooyo miyaadan xasuusan kuwii gawaarida lagu kala jeexay, hooyo sow mag iyo xaq la'aan lama wada aasin, hooyo haddeynaan jihaadin yaa noo nixi, hooyo miyeynaan wax iska celis aqoon, hooyo ficiladii iyo fartaagii aaway, hooyo maxaa dadkan nagu diray, hooyo maxaa duulka na daba dhigay, hooyooy intiina hadhayna waad I daba haysaan, hooyooy kuwani Ajigiina kasii qaab daran, hooyooy hooyo, Hooyo haddaaban ku arko, hooyo sow lugaha kaama sii dhunkadeen!

Hooyadii ayaa ilmadu ka qubatay iyadoo leh Eeboow adigaa awood leh! Eebow adigaa awood leh! Inaa Li-llaahi Wa innaa Illeyhi Raajicuun. Eeboow waxay ahayd Jimce, Eebow waa maalin barakeysan, Eebow waxay ahayd saq dhexe, Eeboow dunidan dhow baad gelinka danbe joogtaa, Eebow ducaduna waa maqbuul, Eeboow naga soo gaadh oo noo gargaar, Eeboow masiibo tii Siyaad ka daran ku rid, Eebow isma qabtaane kawada sim, Eebow sow wiilkeyga ma aragtid, Eeboow sidii hilib la soloy buu noqday, Eeboow adigey iska kaa dhigeen Markey gubeen, Eeboow adiga uun baa ciqaabtaas wax ku ciqaaba, Eeboow ballanqaadkaagii dusha kaga rog, Eeboow Asxaabul ukhduud baan xasuustay, Eeboow Mujaahidkaa magdhawgiisa Janna ka yeel, Eeboow ducadii Nebi Ibraahim u aqbal markuu lahaa: Tawakaltu Cala-llaah, Wakafaa Billaahi Wakiilan. Alla Eebe Naxariis Badanow noo naxariiso, Cidina noo nixi maysee ayay hooyadii kusoo gabagabeysey murugadeedii iyadoo ilmeyneysa!

The Messenger of Allah (Allah bless him & give him peace) said,

"The merciful are shown mercy by the All-Merciful. Have mercy to those on earth, and the Lord of the Heavens will have mercy upon you."

The Messenger of Allah (Allah bless him & give him peace) said,

"Do not punish anybody with Allah's punishment (of fire)."
Tirmidhi-Volume 6, Book 60, Number 47: Narrated Anas.

Inaa Li-llaah, Wa Inaa Ileyhi Raajicuun!
C/Rahman Eelay eediran@hotmail.com

WAAR XABADDU WAA LACAGE DAB KU DHALAALI:Q-II

Waxaa beryahaaba xabsiyada Magaalada Harga-Geys laga buuxinayey dad u dhashay Beelaha laga tirada badan yahay. Waxaa la doonayaa in la demiyo xiisad ka dhalatay wiil u dhashay Beeshaas oo 27 jir ahaa lana odhan jirey **C/Naasir** oo si xun ay Booliska Magaaladu ugu dileen kun gubeen dukaankiisa dhexdiisa. C/Naasir ayaa ahaa ganacsade leh dukaan Timaha lagu xiiro oo ku yaalay Xaafada la yiraahdo Xero Awr. Waa Aji iyo isla weynidiisa iyo ma shaqaystanimadiisa-e waxaa maalin walba loo soo shaqategi jirey sidii baad looga qaadi lahaa C/Naasir. Markii uu u adkeysan waayey ee diidayna inta toori lala dhacay ayaa markii danbena dab la qabadsiiyey.!

Haddaba dadkan haatan la xirixiray ayaa waxay diideen inay qirtaan oo ku sheekeeyaan in C/Naasir uu isagu inta uu batrool isku daaray kabriidna isku qabtay

hiraaboodkii markey saacaddu ahayd 3:00 am. Waxaa ay dadkani diideen inay aqbalaan hadalada aan nuxurka lahayn ee ka soo baxaya ninka afka subagga loo mariyey ee la yiraahdo **Mahdi Cawar**. Goor hore ayay Beeshu ogaatay dabadhilifnimada iyo Munaafiqnimada uu ninkani ku hayo beesha kadib markii uu damcay inuu sidan oo kale daah u saaro dilkii xaqdarada ahaa ee loo geystay **Khadar Dhabar**. Bal akhri qoraalkii hore ee Mahdi Cawar loogu caqli celinayey http://www.midgaan.com/Khadar/khadar18.htm

Waxaa Gobolada Waqooyiga isaga cararay oo galay Dalka Itoobiya dad badan oo ka tirsan Beelaha laga tirada badan yahay iyagoo ka cararaya in la jirdilo, la xabiso amaba la gubo. Waxaa ay Xukuumad ku sheegta meesha ka jirta ay ka xanaaqsan tahay sawirrada markhaatiga u ah dhacdadan ee haatan faraha ka baxay oo ay ku eedeyneyso in ay direen dad ka mid ah Beeshan.

Waxaa C/Naasir la gubay iyadoo aan la xallin arrintii loo geystay Khadar iyo kuwii kasii horeeyey ee meydkooda waraabaha loo dhigay ama kuwii baaruurta lagu kala jeexay.

Waxaa la yaab leh sida ay maanta iyadoo uu xaal halkaasi marayo uu Madaxa **Maxkamadaha Daahir Aweys** uu ugu baaqayo Xukuumad ku sheegta ka dhisan Harga-Geys inay Maxkamaduhu ka xun yihiin dhibaatadii ka soo gaartay Dowladii Siyaad Barre, magdhowna uu ka siinayo wixii soo gaaray iyadoo uu Daahir aweys ogyahay in halkaas lagu dhibaateeyo Culumada Soomaaliyeed, Dadyowga laga tirada badan yahay iyo kuwa aan deegaanka u dhalan intaba. Waxaa magdhow iyo madax salaaxba uga baahan dadkan ay Soomaalidu duleysatay, takoortay, guhaaday oo ilaa maanta aan sharafkooda iyo noloshooda cidna u doodeyn una dagaalameyn.

Waxaa maragmadoonta ah in maanta geyiga Soomaaliyeed oo dhan ay dhibaato, daadad iyo colaadi ka taagan tahay. Waxaana muhiim ah in la ogaado inaysan Soomaalidu walaalow iyo Islaanimo midna aysan cidna ku tixgelineyn ilaa uu Soomaaligu lafihiisa kaaga baqo mooyee.

Haddaba Beelaha lagaga tirada badan yahay Harga-Geys ee kuwa Islaweyni ay sidey doonaan ka yeelayaan waxaa maanta waajib ku noqotay inay sameeyaan laba mid uun si aan eebe weyne Aakhiro iyo Adduunba u ciqaabin sida ku sugan **Suratul Nisa, Ayadda 96-97.**

1. **Inay waddanka ka haajiraan oo dhulka eebahay wuu**

إِنَّ ٱلَّذِينَ تَوَفَّىٰهُمُ ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ ظَالِمِىٓ أَنفُسِهِمْ قَالُوا۟ فِيمَ كُنتُمْ ۖ قَالُوا۟ كُنَّا مُسْتَضْعَفِينَ فِى ٱلْأَرْضِ ۚ قَالُوٓا۟ أَلَمْ تَكُنْ أَرْضُ ٱللَّهِ وَٰسِعَةً فَتُهَاجِرُوا۟ فِيهَا ۚ فَأُو۟لَٰٓئِكَ مَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۖ وَسَآءَتْ مَصِيرًا ﴿٩٧﴾

ballaaran yahaye meel kale soo deydeydaan iyo

2. **Inay naftooda iyo maalkooda u huraan sidii ay sharafkooda, maalkooda iyo dadkooda uga difaaci lahaayeen hororkan aan Diin, Insaaniyad iyo Soomaalinimo cidna ku deyneyn.**

Waxaa uu xaalku maanta marayaa in la yiraahdo: " Xabaddu lacag bay joogtaaye hanaga khasaarinina ee Dab ha la qabadsiiyo". Waxaan la yaabanahay waxa harey ee lasugayo ama la dhowranayo. Akhri qoraalkii hore ee ka hadlayey maahmaahda saxda ah ee ay Soomaalidu isticmaasho ee ah nimaan shantaadu kaa celin sharci kaama celiyo http://www.midgaan.com/Khadar/khadar26.htm

Waxaan maanta la yaabanahay iyadoo:

- **Maanta meel waliba hubku uu marayo oo si sahal ah loo heli karo.**
- **Beeshanina ay Soomaalida ka dagaal yahansan tahay kana duur galsan tahay**
- **Beeshani hadday isu tagto ayba Soomaalida oo dhan ka badan tahay**
- **Aynu ognahay in Soomaaligu uu garanayo oo keliya iska key celi haddii kale nololi waa kaa xaaraan**
- **Beelihii lagu amar kutaagleyn jirey ay maanta neefsadeen**

Maxaa sababay in layna quudhsado oo sidii la doonaba naloo galo? Maxaa sababay in dhulkayagii aynu asal u laheyn maanta aynu ku ahaano meyd socda oo marba mid la aaso.

Waxaa maanta marnaba suuragal ahayn in dulqaadka intaa le'eg iyo aamusnaanta iyo ficil la'aanta aynu kusii jirno. Haddii laga dhiidhiyana sidii ari la dhoofinayo xero nalaga buuxiyo. Waxaan halkan uga soo jeedinayaa in Beeshu ay iska qabato ragga magacooda ku adeeganaya ee caada qaatayaasha ah si deg-deg ahna ay isu hubeeyaan una halgamaan sidii ay sharafkooda iyo xuquuqdooda usoo dhacsan lahaayeen. Waxaanan loo dulqaadan doonin in arrimahani soo noqnoqdaan.

Ogow Mar idage Alla dago, Laba jeer idagase anigay isdagay!

Geediga Wadaay
C/Rahman Eelaay eediran@yahoo.com

Afeef: Aragtida qoraalkan waxaa leh qoraaga ku saxiixan
Faafin: Dec 1, 2006